# DAAWADAAADA: Glipizide ____mg

**<u>Maxaan u qaadanayaa daawadan?</u>** Waxaad leedahay macaan ama waxaad halis ugu jirtaa macaan maxaa yeelay sonkor badan ayaa ku jirta dhiigaaga. In dhiigu yeesho sonkor aad u badan waxay sababi kartaa wadno xanuun, faalig, xanuunada kelyaha, ama dhibaatooyinka xaga indhaha iyo neerfaha.

**<u>Sideen u qaadanayaa daawada:</u> Qaado maalin walba 1 kiinin ah, 30 daqiiqo kahor quraacda ama cuntada ugu horaysa ee maalinta.** Isku day oo qaado kiniinka wakhti isku mid ah maalin walba.

**<u>Maxaan dareemi doonaa markaan qaato daawadan?</u>** Mararka qaarkood waxaad dareemi kartaaa saamayn ay kugu keento daawadu. Saamayntu waa wax iska caadi ah hadaad dareento. Saamaynta qaarkood ay keento qaadashada daawada Glipizide hadii aanu jidhkaagu hore u aqoon waxa ka mida h yalaalugo, matag, shuban iyo calool xanuun.

Saamaynta qaarkood ma dhacaan badanka lakin hadii ay dhacaanba waxay noqon karaan mid halis ah. **Wac 911 ama aad qolka gurmadka isla markiiba haddii aad isku aragto: finan, barar wejiga, bushimaha, carrabka ama cunaha; dhibaato kaa haysato neefsashada ama neefsashada oo adkaata AMA inta lagu jiro burbur daran, waajahayso xanuun, daciifnimo ama dareemid daal.**

**<u>Maxaan kale ee aan u baahanahay inaan ogaado?</u>**

1. Waa inaad qaadataa daawadan xataa hadaad caadi dareento.
2. Waa inaad dib usoo kordhisataa daawada bil kasta.
3. Cab biyo badan.
4. Waxaad u baahantahay inaad dhakhtar aragto 3 bilood ba mar si sonkorta dhiigaaga loo baadho.
5. Hadii aad booqato xafiiska dhakhtar kale, xarun caafimaad, ama qolka gargaarka degdega ah, u sheeg inaad leedahay dhiig kar oo aad qaadato daawada Glipizide.

“Macluumaadka ku jira halkan waxa loogu talo galay kaliya ujeedooyin macluumaad loomana qaadan karo talo khubaro caafimaad ahaan. Markasta weydii talada dhaktarkaaga ama adeeg bixiye daryeel caafimaad oo ku haboon wixii su’aalo aad ka qabtid xaalad caafimaad ama daaweyn.”